

# CAAWIMADA COD-BIXIYAHA



*Waxa jira qaabab badan oo cod-bixiyayaasha leh naafooyin kala duwan ugu codeyn karaan si asturan oo madaxbanaan.*

## **HELITAANKA GOOBTA COD-BIXINTA**

Sharciyada gobolka iyo fadaraalka ayaa uga baahan goobaha cod-bixinta in loo gali karo toos. Magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryar ayaa doorta meelaha goobta cod-bixinta oo kamasuula helitaanka goobta cod-bixinta.

## **CAAWIMADA KATIMAAD DADKA KALE**

Waxaad soo kaxaysan kartaa qof kasta si uu kuu caawiyo inta aad codeynaysid ama waxaad ka heli kartaa caawimo garsoorayaasha doorashada. Kama heli kartid caawimo shaqaaleysiiyahaaga ama midowgaaga. Kaaliyahaaga ayaa ka qeybgali kara dhammaan qeybaha nidaamka codeynta. Kaaliyayaashu ma saameyn karaa sida aad u codeysid ama inaad calaamadid warqada-cod-bixinta haddii aannad u sheegi karin cida aad rabtid inaad u codeysid.

## **KU SAXEEX HADAL AHAAN**

Waxaad xaq u leedahay inaad ku xaqiijisid hadal ahaan cidda aad tahay iyo inaad weydiisatid in qofkale kuu saxeexo haddii aannad saxeexi karin magacaaga adigu.

## **COD-BIXIYAYAASHA CID KAMASUUL TAHAY**

Waxaad codeyn kartaa adoo qof kaa masuul yahay ilaa garsoore si gaara ah kaaga qaado xuquuqdaada inaad codeysid amar maxkamaddeed.

*kasii wad dhabarka...*

## **Xafiiska Xog-hayaha Gobolka Minnesota**

*mnvotes.gov • WAC: 1-877-600-VOTE • QORAAL: 651-217-3862*

### **TAARIIKHAHA 2026**

**COD-BIXINTA HORE**  
*Jun 26 - Ogoosto 10*

**ISKU DIIWAANGALI  
HORE**  
*Marka la gaadho Julaay 21*

**DOORASHADA  
KOobaAD**  
*Talaadada, Ogoosto 11*

**COD-BIXINTA HORE**  
*Sabteembar 18 -  
Noofeembar 2*

**ISKU DIIWAANGALI  
HORE**  
*Marka la gaadho Oktoobar  
13*

**MAALINTA  
DOORASHADA**  
*Talaadada, Noofeembar 3*

# CAAWIMADA COD-BIXIYAHA



...kasii wad xaga hore

## **HELITAANKA MISHIINKA CODEYNTA**

Goobaha codeyntu waxay leeyihiin mishiin kuu calaamadin kara warqada-cod-bixinta. Wuxuu kusiinayaa asturnaana haddii aannad (ama aannad dooran inaad) codeysid adoo isticmaalaya qalin. Mishiinku wuxuu leeyahay shaashad muujinaysa warqada-cod-bixinta oo khad waaweyn ama leh baakgaroon la arki karo. Wuxuu sidoo kale kaaga akhrin karaa warqada-cod-bixinta adiga eerfoono. Waxaad buuxin kartaa warqadaada-cod-bixinta adoo isticmaalaya Braille Keypad, shaashada la taabto ama aalada neefta. Kadib marka aad sameysid doorashadaada, mishiinka ayaa daabacaya warqadaada-cod-bixinta ee dhammeyska ah.

## **CODEYNTA DHINACA WADADA**

Haddii aanad uga tagi karin gaadhigaaga si fudud waxaad codsan kartaa in warqada-cod-bixinta lagu keeno. Tani waxa loo yaqaan 'codeynta dhinaca wadada.' Labo garsoore doorasho oo ka socda xisbiyada siyaasada ee waaweyn ayaa kuu keeni doona warqada-cod-bixinta. Marka aad dhammeysid codeynta, garsoorayaasha doorashada ayaa keeni doona warqada-cod-bixinta gudaha oo kuridi doona sanduuqa cod-bixinta.

## **HEL BADDELKA WARQADA-COD-BIXINTA**

Waxaad xaq u leedahay baddelka warqada-cod-bixinta haddii aad ku sameysid qalad warqada-cod-bixinta kahor inta aannad dhiibin codka.

## **GUDBI DACWAD**

Waxaad xaq u leedahay inaad ka gudbisid dacwad qoraal ah goobtaada cod-bixinta haddii aannad ku faraxsanayn qaabka doorashada loo wado.



*Sawiro koodh-kan si aad u booqatid [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) oo isku diiwaangali inaad codeysid!*